

Janaayo 11, 2021

Qoysaska Qaaliga BPS,

Waxay ahayd mudnaanteena koobaad sanadkii la soo dhaafay badbaadada ardaydeena iyo shaqaalaha maadaama aan isku dheelitirnay go'aannadan aadka u adag iyo kuwa adag ee ku saabsan dib u furidda dhismayaasha dugsigaa ee waxbarashada fool kafoolka ah. Waan ognahay inay tan kugu adkeed waadna kugu mahadsantahay dulqaadkaaga. Maanta waxaan tani u qoreynaa inaan kugula socodsii noo jadwalkayaga cusboonaysiinta ee dib-u-furista iyo waji-gelinta ardayda dheeraadka ah ee wax-barashada fool kafoolka ah.

Waxaan si dhow uga wada shaqeynay muddadan cudurkan faafayey Madaxa Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Boston Marty Martinez, iyo kooxda ka socota Guddiga Caafimaadka Dadweynaha ee Boston (BPHC) si ay dib ugu eegaan sayniska ugu dambeeya una hubiyaan inaan sameyneyno wax kasta oo suurtagal ah si loo hubiyo nabadgelyada bulshadeena Boston Public Schools (BPS).

Iyada oo lagu jiro shaqada Guddi Mudnaanta Fool kafoolka ah (oo ay ku jiraan shaqaalaha BPS, xubnaha Midowga Macallimiinta Boston, waalidiinta iyo ardayda) iyo iyada oo loo marayo xallinta hal-abuurka ah ee ay tilmaameen Hoggaamiyeyaasha Dugsiyada iyo macallimiintu, waxaannu diyaar u nahay inaan ku dhawaaqno wejiga xiga ee soo noqoshada barashada fool kafoolka ah, iyo sidoo kale jadwalka muddada dheer.

Inta la sugayo qiyaasaha caafimaadka bulshada ee la aqbali karo, BPS waxay qorsheyneysaa inay soo dhaweyso inta hartay ee ahmiyadeena sare ee barashada fool kafoolka ah oo bilaabaneyso **Isniinta, Febraayo 1**. Ardayda soo noqonaysa waa kuwa loo aqoonsaday mudnaanta barashada fool kafoolka ah, oo ay ka mid yihiin:

- Ardayda naafada ah ee baahida sare / Heerka 4-aad
- Bartayaasha Ingiriiska ee ah heerarka EL 1 iyo 2
- Ardayda ay gacanta ku haysao Waaxda Carruurta iyo Qoysaska
- Ardayda ay la soo deristay hoy la'aanta
- Ardayda waxbarashadooda rasmiga ah ay xaddidan tahay ama la joojiyay
- Ardayda ay aqoonsadeen Kooxda Taageerada Ardayda ee dugsiyadoodu (SST) inay u baahan yihiin waxbarasho dheeraad ah ee barashada fool kafoolka ah

Tani waxay u keeni doontaa 4,900 arday oo dheeraad ah dhismayaasha iskuulka. **Si toos ah ayaa kugula soo xiriiri doono iskuulkaaga haddii ilmahaagu u qalmo inuu soo noqdo.**



Marxaladda xigta ee dib-u-furidda dhismayaasha iskuulka ayaa ah soo noqoshada ardayda dooratay barashada isku-dhafan, oo ah wejiyada heerarka fasalka illaa Maarso oo dhan.

Waxaan qorsheyneynaa inaan raacno jadwalkaan joogtada ah:

- **Isniinta, Maarso 1 & Khamiista, Maarso 4:** Ardayda dhigata K0 - Fasalka 3 (Kooxda A & B)
- **Isniinta, Maarso 15 & Khamiista, Maarso 18:** Ardayda Fasalada 4 - 8 (Kooxda A & B)
- **Isniinta, Maarso 29 & Khamiista, Abriil 1:** Ardayda Fasalada 9 - 12 (Kooxda A & B)

Ardayda aan u qalmin mudnaanta barashada tooska waxay xaq u yeelan doonaan laba maalmood oo waxbaris ah usbuuc kasta, iyadoo ardayda ku jirta Kooxda A ee dugsiya Isniinta iyo Talaadada iyo kuwa loo qoondeeyey Kooxda B ee dugsiya maalmaha Khamiista iyo Jimcaha. Dhammaan dhismayaasha si buuxda ayaa loo nadiifin doonaa loona buufin doonaa Arbacada, iyadoo dhammaan ardayda wax lagu baran doono habka fogaanta.

Waxaa kula soo xiriiri doona iskuulkaaga si aad u ogaatid faahfaahinta qorshaha ku laabashada barashada tooska ee waxbarashada. Maalmaha soo socda, waxaad heli doontaa xusuusin ku saabsan isku-darka wadajirka ah iyo qaabka loo xilsaarayo barashada ilmahaaga iyo hel tilmaamaha si aad u cusbooneysiiso dookhaaga qaabka waxbarasho haddii aad rabto.

Fursadeena aan ugu laabaneyno barashada tooska ah waxaa si dhow dib u eegay BPHC, saraakiisha caafimaadka bulshada ee Magaalada Boston. Waxay dib u eegeen qorshayaasheena waxayna ansixiyeen qaabkeena aan ku kordhinayno caafimaadka iyo badbaadada ardayda, macalimiinta, iyo shaqaalaha.

Booqo bostonpublicschools.org/reopening si aad waxbadan uga barato baratakoolka dheeraadka ah ee caafimaadka iyo badbaadada iyo shaqadii laqabtay sanad dugsiyeedkaan.

Intaan isu diyaarinayno soo noqoshada ardaydeena, waad nagu caawin kartaa adiga oo u hoggaansamaya dhammaan tilmaamaha caafimaadka dadweynaha. Fadlan sii wad xirashada maaskarada markasta oo aad ka baxdo gurigaaga, gacmahaaga si joogto ah u dhaq, guriga iska joog hadaadan fiicnayn, oo si joogto ah iskaga baar COVID-19 goob kasta oo bilaash ah oo tijaabada Magaalada Boston ah. Si aad u hesho goob baaritaan, iyo macluumaad iyo ilo dheeraad ah ee COVID-19, booqo boston.gov/covid.

Waxaan rajeyneynaa inaan si dhakhso leh dib ugu soo dhaweyno ardaydeena iskuulka!



Brenda Cassellius,
Kormeeraha Guud